



**SOMALI NATIONAL  
BUREAU OF STATISTICS**  
Federal Republic of Somalia

# TUSAHA SICIRKA BADEECADAHA DISEEMBAR 2024



## Warbixin kooban

Dhammaan qeybaha Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) bishii Diseembar 2024 ayaa gaaray 151.57, marka la barbardhigo 152.46 bishii Nofeembar 2024.

Isbedel bileedka, Diseembar 2024, marka la barbar dhigo Nofeembar 2024, ayaa hoos u dhacay -0.58 boqolkiiba. Majirin wax isbedel ah oo la taaban karo bishii Diseembar.

Guud ahaan, sicir bararka 12kii bilood ee la soo dhaafay Diseembar 2023 iyo Diseembar 2024 (heerka sicir bararka), dhammaan qeybaha TSB ayaa sare u kacay 5.57 boqolkiiba, marka la barbardhigo 5.20 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay Nofeembar 2023 iyo Nofeembar 2024.

### Shaxda 1: Tusaha Sicirka Badeecadaha; Diseembar 2024 (Dec 2014 = 100)


Tusaha Sicirka Badeecadaha, Diseembar 2024	
Tusaha bishan (Diseembar 2024)	151.57
Tusaha bishii hore (Nofeembar 2024)	152.46
Tusaha sanadkii hore (Diseembar 2023)	143.57
Isbedelka bilaha ah boqolkiiba %	-0.58%
Isbedelka heerka sicir bararka sanadlaha ah boqolkiiba %	5.57%

### Heerka sicir bararka marka loo eego TSB-da

Isbedelka boqoleyda ee 12 bilood.

### Tixraca TSB-da

Index = 100 @ December 2014



Isha Xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Diseembar 2024** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiiteka Agaasinka <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS\_somalia

## Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) Diseembar 2024

### Guud ahaan heerka Sicir Bararka: Dhammaan Qeybaha TSB, Diseembar 2024

Heerka sicir-bararka bisha Diseembar 2024 waa isbedelka boqolleyda ee Tusaha sicirka badeecadaha (TSB) 12kii bilood ee la soo dhaafay, Diseembar 2023 iyo Diseembar 2024.

**Dhammaan qeybaha TSB** ayaa sare ukacay 5.57 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay, Diseembar 2023 iyo Diseembar 2024, marka labar bardhigo 5.20 boqolkiiba 12kii bilood, Nofeembar 2023 iyo Nofeembar 2024.

**Dhammaan qeybaha TSB isbedelka** billaha ah ee Diseembar 2024 ayaa sameeyey hoos u dhac dhan -0.58 boqolkiiba.

### Guud ahaan heerka sicir bararka: qeybo ka mid ah badeecadaha, Diseembar 2024.


Heerka sicir bararka qeybaha **cuntada iyo cabitaanada** iyo **guryaha, biyaha, korontada iyo gaaska** ayaa ah kuwa ugu saameynta badan badeecadaha oo dhan looguna isticmaalka badan yahay **dhammaan qeybaha TSB-da**.

**Cuntada iyo Cabitaanada** ayaa qiimahooda bilaha ahi hoos u dhacay -1.00 boqolkiiba, bishii Diseembar 2024. Tani ayaa sababtay in qaar ka mid ah cuntada qutul daruuriga ah uu qiimahoodu sare u kaco. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa hoose u dhacay -1.49 boqolkiiba bishii Diseembar 2024. marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah oo gaaray -2.72 boqolkiiba Nofeembar 2024.

**Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska** ayaa sare ukac bille ah sameeyey 0.31 boqolkiiba ee bishii Diseembar 2024. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa sare u kacay 0.70 boqolkiiba Diseembar 2024. Tan ayaa imaanaysa marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah oo hoos u dhaciisu gaaray 0.39 boqolkiiba Nofeembar 2024.

### Dhammaan qeybaha TSB-da & qeybaha la xushay.

Index = 100 @ December 2014




Isha Xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Diseembar 2024** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitaka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS\_somalia

## A. Qeybaha ugu weyn ee isbedelka Sanadlaha ah (TSB)

Jaantuska 1: Sicir bararka sanadlaha ee dhamaan qeybaha; Diseembar 2024(Dec 2014 = 100



### Qeybaha ugu weyn ee sicirkoodo Kordhay (+):

- **Isgaarsiinta** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 78.31 boqolkiiba bishii Diseembar 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha telefoonka iyo qalabka telefax (+100.18 boqolkiiba).
- **Maqaayadaha & Hoteelada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle 32.20 boqolkiiba bishii Diseembar 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid Hoteelada (+44.11 boqolkiiba).
- **Hawo Bedeleshada & Dhaqanka** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 30.69 boqolkiiba Diseembar 2024. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay qiimaha Maqal & Muuqal, Sawir iyo Macluumaadka oo u gaaray (+34.76 boqolkiiba).
- **Dharka & Kabaha** ayaa la diiwaan galiyey sare u kac sanadle ah oo dhan 22.82 boqolkiiba Diseembar 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Dharka (+24.43 boqolkiiba), sare u kaca waxaa sababay Dharka caruurta (+92.30 boqolkiiba).
- **Gaadiidka** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 21.22 boqolkiiba Diseembar 2024. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay qiimaha lagu iibsado Gawaarida oo gaaray (+33.46 boqolkiiba).
- **Agabka Guryaha, Qoyska & Dayactirka** ayaa laga diiwaan galiyey sare u kac sanadle ah oo dhan 21.13 boqolkiiba Diseembar 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Agabka Guriga iyo Farsamooda, Rogaga iyo iyo waxyaalaha sagxadda lagu goglo oo gaaray (+27.75 boqolkiiba).
- **Alaabaha yaryar & Adeegyada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 17.26 boqolkiiba Diseembar 2024. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay qiimaha alaabooyinka gaarka ah ee shaqi ahaan loo isticmaalo oo qiimahoodu gaaray (+20.09 boqolkiiba).

War bixin bileedka bisha **Diseembar 2024** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitaka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS\_somalia

- **Caafimaadka** ayaa la diiwaan geliyey sare u kac sanadle ah 2.39 boqolkiiba, bishii Diseembar 2024. Sare ugu badan ayaa ka dhashay qiimaha Adeega Isbitaalada (+17.46 boqolkolkiiba).


**Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu Hoos u dhacay Bishii Diseembar 2024 (-)**

- **Tubaakada** ayaa la diwaangaliyey hoos u dhac sanadle ah oo gaaraya -18.56 boqolkiib bishii Diseembar 2024. Hoos u dhaca ugu badan ayaa ka yimid tubaakada (- 30.77 boqolkiiba).
- **Tacliinta** ayaa sameeyey hoos u dhac sanadle ah -5.78 boqolkolkiiba bishii Diseembar 2024. Hoos u dhaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha warbarashada ee dugsiga sare ka danbaysa (-12.00 boqolkiiba).

**Qeybaha ugu waa weyn ee qeybaha kala duwan ee saameeya isbedelka bilaha ah ee TSB –da**

**Jaantuska 2: TSB; Isbedelka Sicirbararka ee bilaha dhamaan qeybaha; Diseembar 2024**

(Dec 2014 = 100)



**Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu kordhay Bisha Octoobar 2024(+)**

- Majirin qiimo koror la taabankarey bishii Diseembar.

**Qeybaha ugu waaweyn oo sicirkoodu hoos u dhacay(-)**

**Alaabaha yaryar & Adeegyada** ayaa sameeyey hoos udhac bille ah oo gaaraya -2.08 boqolkiiba Diseembar 2024. Hoos u dhaca ugu badan waxaa sababay qiimaha alaabooyinka shaqsi ahaan loo isticmaalo oo gaaray (-2.60 boqolkiiba).

## Shaxda 2: Isbedelka tusaha sicirka ee qeybaha badeecadaha Diseembar 2024 ee habka (COICOP)

Habka kalasaarida caalamiga ee COICOP	TSB Weight	Diseembar 2023 TSB	Nofeembar 2024 TSB	Diseembar 2024 TSB	% Boqolkiiba Bishan iyo Bishii hore	% Boqolkiiba Isbedelka Sanadkii Hore iyo Sanadkaan
<b>Dhamaan Qeybaha TSB-da</b>	100.00	143.57	152.46	151.57	-0.58	5.57
Cuntada & Cabitaanada	46.04	141.32	140.62	139.21	-1.00	-1.49
Tubaakadda	1.25	173.80	141.55	141.55	0.00	-18.56
Dharka & Kabaha	5.03	169.78	210.29	208.52	-0.85	22.82
Guryaha, Biyaha, Korontada & Gaaska	23.41	144.35	144.92	145.36	0.31	0.70
Agabka Guryaha	2.93	119.27	144.81	144.47	-0.23	21.13
Caafimaadka	5.00	182.78	187.98	187.15	-0.44	2.39
Gaadiidka	3.77	122.21	148.80	148.14	-0.44	21.22
Isgaarsiinta	2.80	166.78	298.78	297.39	-0.46	78.31
Hawo Bedeleshada & Dhaqanka	1.00	104.30	137.26	136.31	-0.70	30.69
Tacliinta	4.00	116.95	110.26	110.18	-0.07	-5.78
Maqaayadaha & Hoteelada	2.00	150.45	200.76	198.89	-0.93	32.20
Alaabaha Yaryar & Adeegyada	2.77	121.41	145.38	142.36	-2.08	17.26

### Ogeysiis:

Tusaha Sicirka Badeecadaha waa sahan ku saabsan badeecadaha iyo adeegyada ay isticmaalaan qoysaska caadiga ah. Xogta sahanka waxaa la soo ururiyaa Todobaadka koowaad iyo kan sedexaad ee bilkasta. Sicirka badeecadaha iyo adeegyada waxaa laga soo ururiyaa goobaha ganacsiga ee afarta suuq ee ugu waa weyn Magaaladda Muqdisho.

### Soosaarida tan xigta


Tixraaca Sicirka Badeecadaha (TSB), Janaayo, 2024 waxaa la baahin doonaa 15 Febraayo, 2025. Wixii faahfaahin intaasi dheer ee ku saabsan (TSB) iyo xogaha kale ee rasmiga kala soco Xafiiska Istaatistikada, Fadlan booqo Bogeena rasmiga ah ee <http://www.nbs.gov.so>.

War bixin bileedka bisha **Diseembar 2024** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS\_somalia

**Lifaaqa 1aad: Dhamaan Qeybaha 'TBS' – qeybaha ka qeyb qaata heerka sicir-bararka bishii Diseembar 2024 marka loo eego COICOPka**

**Dhamaan qeybaha TSB-da**

Qeybaha ka qeybqaata (%) heerka sicir bararka ( COICOP)



Isha Xogta: NBS

**Lifaaqa 1aad** wuxuu bixiyaa falanqeyn kusaabsan heerka sicir bararka ee Bishsa oo loo qeybiyey iyo is barbardhiga qeybaha, ayada oo loo eegayo qeybaha COICOP loona soo bandhigayo sida ay u kalasaameyn badan yihiin (ka qeyb qaadashadooda) dhamaan qeybahaha 'TSB ka.

War bixin bileedka bisha **Diseembar 2024** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS\_somalia